DAAWAYNTA CILLADA MAADADA BIRTA

MAADADA BIRTA U JIRKA SIDO
Birta waa maado (curiye) muhim ah oo ku jirta dhammaan unugyada jirka. Jirka aadenaha waxaa qiyaastii ku jirta 3,5 graam oo bir ah, taasoo u dhigan 7.5 seentimteter oo musmaar ah. Maadada birta waxay ku jirta jirka iyadoo ah saddex nooc ah, maadada gaduudan dhiigga ku jirta oo ah sideha curieha hawada (haemoglobin), keyda birta ee jirka, birta nudeha murqaha iyo dheecaanka dhiigga.

HAWALAHA UGU MUHIMSAN AY MAADADA BIRTA QABATO
Maadada birta hawllo badan ayee jirka ka qabata. Hawsha ugu muhimsan waa guurinta curiyeha hawada. Sidaas awgeed, afartii qayb ba saddex qaybood waxay ku jirta maadada gaduudan dhiigga ku jirta oo ah sideha curieha hawada (haemoglobin). Curiehaaso shaqadooda ah in maamulida curieha hawada laga soo qaado sambabaha oo la geeyo dhammaan nudeha jirka. Birta nudeha waxay maamusha keydinta hawada lafaha iyo unugyada murqaha wadnaha. Maadada birta waxay lagamaarmaan u tahay soo saarida unugyada gadgaduudan ee dhiigga.

BAAHIDA MAADADA BIRTA
Baahida maadada birta way kala duwan tahay. Xitaa la'aanshada maadada birta sidaasoo kale ay u kala duwan tahay. Sidaas awgeed, qaadashada maadada birta waa arrin ku xiran hadba baahida jirkayga. Dumarka kadib markii ay cisogoyaan iyo ragga ba waxay maalin kasta u baahan yihiin qiyaastii 10 mg. Dumarka kale na iyo dhallinyarada waxay maalin kasta u baahan yihiin qiyaastii 10-20 mg. Dadyoowga isboortiga ku firfircoon rag iyo dumarba intaas kabadan ayee u baahan yihiin. Baahida maadada birta ee dumarka uurka leh, waxay sare u kacda laga bilaabo toddobaadka 20:aad. Cudurrada caaloosha ku dhaca qaarkood iyo kuwa cillada nuugitaanka waxay sare u qaadaan baahida maadada birta.

CILLADA MAADADA BIRTA
Markii cillada maadada birta ay jirto, wuxuu jirku sida uu ku soo saaro unugyada gadgaduudan ee dhiigga awgeed, marka hore adeegsanayaa keyda maadada birta ee jirka. Haddaba jirku wuxuu maadada birta ka soo qaadanyaa keydka birta sida lagu helo maadada gaduudan dhiigga ku jirta oo ah sideha curieha hawada (haemoglobin) oo dheelitiran. Sidaas awgeed, shaybaarka dhiigga kama muuqato haddii keyda maadada birta uu hoos u dhacay ama la faruuqiyay. Astamaha cillada maadada birta waxaa kamid ah daal, inakstoo natiijada shaybaarku (Hb) uu caadi ahaa. Markii la shaacbixiyo hoos u dhaca (Hb) xaaladaas keyda maadada birta hoos bu dhacay ama waa la faruuqiyay. Xaaladaas cilladii maadada birta waxay isku rogtay cudurka loo yaqaanno (anemi) oo sabab ah cillada maadada birta.

ASTAMAHA CILLADA MAADADA BIRTA (JÄRNBRISTANEMI)
Astamaha cillada maadada birta (anemi), waxaa kamid ah daal iyo tamardarro, neeftuur markii qofku uu hawlyar ku dhaqaaqo, wejicaddaan, hoos u dhaca xoogsaarka, kadeedin iyo wadne boodbood. Waa lagamaarmaan in cillada maadada birta wax laga qabto sidii loogu hortago cillada maadada birta (anemi).

NIFEREX

CILLADA MAADADA BIRTA IYO UUR-QAADIDA

Xilliga uur qaadida waxay haweeyneyda u baahan tahay maadada birta oo dheeraad ah, taasoo ay ka heli karin raashinka. Baahida maadada birta ee dumarka uurka leh, waxay sare u kacda laga bilaabo toddobaadka 20:aad. Haddaba sidii loogu hortago cillada maadada birta (anemi) xilliga ummulida iyo xilliga ku xiga ba, ayaa waxaa dumarka loogula talinayaa in ay qaataan daawada maadada birta laga bilaabo toddobaadka 20:aad.

SABABTA CILLADA MAADADA BIRTA KEENTA

Cillada maadada birta waxaa sababa caadada dhiigbaxa badan, uur-qaadid, hawl-jireed oo muddo dheer la qabtay, deqsiinta dhiigga, korniinka dheeraad ee da'yarku, dhiigbax iyo cuntaynta raashinka maadada birta ku yar iwm.

MAADADA BIRTA RAASHINKA LAGA HELO

Hilbaha waxaa ku jira maadada birta (hemjärn) waana kan ugu fiican oo maadada birta laga helo. Hilbaha hadba sida uu gaduudan yihiin ayaa maadada birta (hemjärn) loogu hela. Maadada birta khudaarka ku jirta aanan ahayn (hemjärn) sida spinashka iyo barsleyga hab fudud jirka maadada birta ugu ma dhuuqi karo. Ka dhuuqida maadada birta ee khudaarta ku jirta waxaa sare loogu qaadi kara haddii isla markaas la cunno hilib iyo fiitamiinka-C.

NIFEREX® 100 MG/KAABSUL

Niferex waa daawo lagu daaweeyo cillada maadada birta iyo cillada maadada birta (anemi). Maadada waxtarta leh [ferroglycinsulfat] waa fiitamiinka-C oo suuragelineyso sare u qaadka dhuuqida maadada birta. Mindhicirka yar waa goobta maadada birta lagu dhuuqo. Sidaas awgeed, qolofta kaabsulka Niferex® wuxuu ka samaysan yahay maado u adkaysan karto dheecaan-caloolsha, sidaas maadada birta waxay ku dhalaasha mindhicirka yar. Hawlkalga kaabsalka waxaa weeyaan isku haynta iniinyada yaryar.

Waxyeelka daawada waxay noqon karaan, shuban, caloolfadhi, laabjeex, matag ama calool-xannuun noocyo kale ah, oo laakinse aad u yar (ka yar 1qof 10 000-kii ba). Waxaa kaloo dhici karto finan oo laakinse aad u yar. Saxaarada oo madoow noqota.

Daawada waa in loo qaata sida shaqaalaha daryeelka caafimaadka kula taliyeen ama sida baakada ku qoran.

Qiyaasta daawada ee ugu caadiyeeysan waa hal kabsuul oo biyo lagula liqo. Waxaa kaloo la yeeli karo in daawada kaabsulka ku jirta qaado lagu shubo, markaas kadib biyo lagu cabbo iyadoo iniinyada yaryar aanan la calaanjinin. Maadaada [Gelatin] waxay ku jirta oo keliya qolofta kaabsulka. Iniinyada yaryar ee maadada birta kuma jiraan maado laga sameeyay dheecaanka xayawaanada. Carruurta da'dooda ka hoseeyso 6 sano looma oggola in la siiyo daawada Niferex.

Iska ilaali in daawada aad la qaadato raashin hoos u dhigaayo awooda jirka uu maadada birta ku dhuuqo, kuwaasoo kamid ah caano, qaxwo, shaah, shukulaato iyo badarka aan sii fiican u shiidnayn sida qalbac iyo qolofta.

Daawada waa in la qaata ilaa laga helo heerka curieha hawada ee dhiigga (Hb) ay caadi ka noqdaan, markaas kadib na la sii wado ilaa uu keyda maadada birta uu ka buuxsammo.

Haddii qofku uu qaato daawada Niferex inkastoo usan lahayn cillada maadada birta, wax dhibaato ah uma keeyneyso. Maadaama jirku u keydsanaayo maadada birta haddii cillad ay jirto. Maadada birta ee jirku u baahnayn waxay soo raacaysa saxaarada.

EROLAB
Tal 0411-391 85
www.erol.se